



**MACLUUMAAD MUHIIM U-AH
WAALIDIINTA / WAKIILADA
SI AAD ULA SOCOTO**

Miyey Shaqeynaysaa koontadaada Xiriirka Waalidka? Ku dadaal ka qayb-qaadashasda waxbarashada ilmahaaga, adoo diyaarinaya isla markaana saxiixaya bogga Xiriirka Waalidka ee Dugsiyada Magaalada Columbus. Iyadoo loo marayo Xiriirka Waalidka, waxaad awood u yeelan doontaa inaad si ammaan ah uga hesho macluumaadka qimaha leh ee ardaygaaga (daada):

- Xiriirka Macalinka
- Jadwallada Fasalada iyo Koorsada
- Imaanshaha Maalinlaha ah
- Cashirrada Aan laga shaqayn
- Codsiyada waraaqo la'aanta ah: Xulashada Dugsiga, Dugsiga Jiilaalka (Kuleylaha), iyo Xirfadaha Tiknoolooyiyadda
- Cusbooneysii Macluumaadka Xiriirka
- Bixi Lacagaha (Khidmadaha)

WAXA CUSUB 2019-2020! Macluumaadka ugu dambeeya ee cusbooneysiinta cunugaaga ayaa loo baahan yahay si ay Degmadu iyo dugsiyadeedu ula xiriiraan qoyskaaga taleefoon, qoraal, iyo emayl. Aad ayey muhiim u tahay in la cusbooneysiyo macluumaadka xiriirka ilmahaaga sanad walba, haddana aad ayey ugu fududhay khadka tooska ah iyada oo loo marayo Xiriirka Waalidka.

Ma loo baahan yahay in cusboonaysiiso macluumaadkaaga xiriirka? Dhammaantood waa la cusbooneysiin karaa iyada oo loo marayo Cusbooneysiinta Sannadlaha ah ee Xiriirka. Tan waxaa ka mid ah xiriirada deg-degga ah (emergency contacts), lambarada taleefoonnada, iyo ciwaannada emaylka. Dugsiyada Magaalada Columbus waxay ku gudbiyaan macluumaadka ku saabsan Bakhtiyaa-nasiibka Kaladoorashada Dugsiga (School Choice Lottery), Xirfadaha Tiknoolooyiyadda (Career Tech), Dugsiga Jiilaalka/Kuleylaha (Summer School), iyo ogeysiis yada kale ee ku habboon iyaga oo adeegsanaya wicitaanno otomaatig ah iyo xiriiro e-mayl ah.

Ma bedeshay ciwaanka? Waalidiinta iyo wakiilada waxay hada cusbooneysiintaa karaan ciwaanka gurigooda waxayna sameyn karaan codsiga bedelaadda ciwaanka ardeygooda ee khadka tooska ah (online-ka) iyagoor adeegsanaya Cusbooneysiinta Sannadlaha ah, iyagoonan aadin Xarunta Dhexe ee Diwaangelinta (Central Enrollment Center).

Foomamka Sannadlaha Muhiimka ah ayaa sidoo kale waxaa lagu dhammaystiri karaa khadka tooska ah iyada oo loo marayo Cusboonaysiinta Sannadlaha ah ee Xiriirka. Tan waxaa ka mid ah aqoonsiyo sida Macluumaadka Xiriirka deg-degga ah (emergency contacts), Oggolaanshaha Siidaynta Macluumaadka Ardayda, Adeegsiga Internetka ee La Aqbali Karo, Xuquuqda FERPA, iyo Foomka Isafgaradka.

Cusbooneysiinta Sannadlaha ah si dhakhso leh ayaa looga shaqeyn doonaa, waalidiintuna waxay heli doonaan emayl xaqijin ah markay cusbooneysiintooda dhammeeyaan.

MA U BAAHAN-TAHAY INAAD HESHO CAAWIMAADDA ISKU XIRKA? Waalid /wakiil kasta wuxuu leeyahay hawlgalinta koodka lagu galo internet-ka (Activation Code) oo ugaar ah qof-ahaantiisa.

HAWLGALINTA DHANKA XIRIIRKA WAALIDKA (PARENT PORTAL) WAA MID FUDUD.

1. Booqo mareegteenna (websaykeenna) ah www.ccsoh.us oo guji bogg furaha QOYSASKA
2. Dhagsii xiriiriyaha XIRIIRKA WAALIDKA (PARENT PORTAL) ee dhanka bidix.
3. Dhagsii battoonka oranaya MARKII UGU HOREYSAY EE HAWLGALINTA ADEEG-SADAHA (USER ACTIVATION)
4. Gal HAWLGALITAADA (Koodkaaga) waxqabadka (la xiriir dugsigaaga si aad u hesho mid haddii loo baahdo). Waan ognahay inay dheer tahay - taasi waxay ka caawinaysaa in xogta la ilaaliyo - markaa si taxaddar leh u qor. Marka koodka (code-ka) la hawlgaliyo, dib looma adeegsan karo.

5. Raac tilmaamaha si aad u sameysato magacaaga adeegsiga(username)/lambarkaaga sirta ah (password) iyo inaad ku darto cinwaanka emaylka soo kabashada.
6. Haddii aad ilowday magacaaga adeegsiga (username)/ lambarkaaga sirta ah (password), guji ADEEG-SADAHA JIRA ee dhanka Xiriirka (Portal), ka dib riix WAAN ILOOBAY MAGACA ADEEGIGA (USERNAME)/LAMBARKA SIRTA AH (PASSWORD), macluumaaadkana waxaa loo diri doonaa emaylka loo adeegsadey sameynta koontada. Hadii aadan gali karin emaylkii aad adeegsatay markii aad sameysaneysay koontada, fadlan ku soo dir aqoonsi sawir leh (ID) parentportalaccess@columbus.k12.oh.us .

Galitaanka Xiriirka Waalidka (Parent Portal login) wuxuu sidoo kale kuu oggolaanayaa inaad heysato digniino qof-ahaaneed oo toos loogu soo diro taleefoonkaaga casriga ah (smartphone) iyadoo loo marayo (**Arjiga - Mobile App-ka) ee Dugsiyada Magaalada Columbus.** Wuxaan hada ka soo dejisan kartaa barnaamijka Arjiga (mobile App-ka) oo bilaash ah dugsiyada magaalada Columbus, adoo ka baaraya Kaydka Arjiyada (app store-ka) taleefoonkaaga gacanta ee Dugsiyada Magaalada Columbus.

WELI WAX SU'AALO AH MA JIRAAN?

Ka wac Degmada Khadka FACTLine ee 614-221-FACT (3228) ama Xarunta Dhexe ee Diiwaangelinta (Central Enrollment) ee 614-365-4011.